




WAR-SAXAAFADEED

Muqdisho- 02 March 2020- Iyadoo laga duulayo walwalka sii badanayo ee caalamku uu ka qabo sii faafitaanka cudurka COVID-19, iyo dareenka bulshada Soomaaliyeed ee ku aadan cudurka COVID-19, Wasaaradda Caafimaadka waxay la wadaagaysaa bulshada Soomaaliyeed war-saxaafadeedkaan:

1. Wasaaradda Caafimaadku waxay xaqiijinaysaa in uusan wali jirin xaalad la xariirta cudurka COVID-19 oo soo galay wadanka, waxaana ilaahay ka rajaynaynaa in uu naga ilaaliyo.
2. Wasaaraddu waxay qaadday tallaabooyin iyo dadaallo looga hortagayo cudurka COVID-19 iyadoo kaashanaysa hayadaha kala duwan ee dowladda, sida Wasaaradda Gaadiidka & Duulisata Hawada, Hayadda Duulista Rayidka, Hayadda Socdaalka iyo Jinsiyadaha, Wasaaraddaha iyo Xafiisyada kala duwan ee khusayso howshaan, sida Xafiiska Raysal-Wasaara, Wasaararadda Maaliyadda, Wasaaradda Maaraynta Musiibootinka, Wasaaradda War-faafinta iyo Wasaaradda Dekadaha, si wasaard & hayad kastaa ay uga qaadato qaybta uga aadan dadaallada ka hortagga cudurka COVID-19.
- 3.
4. Wasaaraddu waxay howlgalisay howl-wadeennada caafimaadka isu gooshka oo ay ka midyihiin qaybaha ka howl-gala gagida caalimiga ah ee Aadan Cabdulle, si lamid ahna waxay kala shaqaynaysaa dhammaan Maamul Goboleeyada dalka sidii ay u qaadi lahaayeen tallaabooyinka ka hortagga cudurka COVID-19.
5. Wasaaraddu waxay dhistay guddiyo kala duwan oo heer farsamo ah, kuwaas oo si joogta ah ugu howllan, la socodka, qorsha dajinta, u diyaar garowga sidii looga hor tagli lahaa looguna diyaar garoobi lahaa cudurka COVID-19 ayadoo la diyaariiy qorshe qeexan iyo howl-tilmaameedyo kala duwan oo lagu howlgalo, sidoo kalena guddiga waxay xariir joogta ah la leeyihiin gudiyada noocooda ah ee ka dhisan waddamada gobolka, si la isu dhaafsado xogta, farsamada iyo aqoonta.
6. Wasaarraddu waxay hadda dadaalkeeda ku jirtaa diyaarinta xarumo lagu karantiilo haddii ay dalka yimaadaan dad looga shakiyo cudurka COVID-19, ilaahay ha naga ilaaliyee.
- 7.
8. Wasaaraddu waxay sidoo kale xariirro iyo kulama wada shaqayn la leedahay hayadaha caawiya caafimaadka dalka sida Hayadda Caafimaadka Aduunka oo ay wada leeyihiin guddi isku dhafan oo ka shaqeeya ka hortagga iyo u diyaar garowga cudurka COVID-19, waxay sidoo kale 4-03-2020 qabanaysaa kulan la isugu keenayo dhammaan deeq bixiyaasha iyo hayadaha caawiyo caafimaadka si ay qayb uga qaataan ka hortagga iyo u diyaar garowga cudurka COVID-19.

- 
9. Wasaaradda waxay ka codsanaynaa dhammaan bulshada Soomaaliyeed qaybaheeda kala duwan inay qayb ka qaataan ka hortagga iyo la dagaalanka cudurka COVID-19. Aan dhammaan ka wada shaqaynno bad-qabka bulshadeenna, adigoo ka bilaabayo naftaada iyo qayskaaga, raacayana tilmaamaha iyo farriimaha caafimaad ee ay sida joogtada ah idiinla wadaagayso Wasaaradda Caafimaadka.
 10. Wasaasarradu waxay si joogta ah idiinla wadaagi doontaa farriimaha, warbixinnada iyo xogaha la xariiro cudurka COVID-19 oo aad kala socon karto baraha rasmiga ah ee Wasaaradda, warbaahinta gudaha (idaacadaha & telefishinada). Waaan ka codsanaynnaa bulshada iyo war-baahintuba inay xogta ka qaataan ilaha rasmiga ee Wasaaradda, si aan uga hortagno walwal galinta bulshada iyo faafinta kutirikuteenta.

Aan kawada shaqayno badqabka bulshadeenna.

Allaha ilaaliyo shacabka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan.

Wixii faahfaahin dheeri ah kala xiriira:

Madaxa Xafiiska Xiriirka iyo Isgaarsiinta

Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada- XFS

communication@moh.gov.so

Dhammaad

###